© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

Hadimo Jacayl

Waa sheekho aad u xiiso badan oo ka waramaysa dhib, rafaad, iyo hadimooyinka ay dadka dibada ka yimadaa ku hayaan dhalinyarada is jecel ee dalka iyo siday ugu nugul yihiin waalidku dadka dibada ka yimaada ee aan loo tix galin jacaylka lamanaha ee wiilka iyo gabadha iyo guusha uu ku danbeeyo jacaylka runta ahi.

Waxa qoray: **Mukhtaar Cabdi Sheekh** ***(Bulshaawi)***

mukho4me@hotmail.com mukhinho@gmail.com

Sheekadani waxa ay ka hadlaysaa wanaaga jacaylka marka labada qof raalida isku yihiin iyo sidayna waalidku u ixtiraamin jacaylka hablaha ee loogu qasbo nin aanay garanayn oo lagu siinayo dibada ayuu ka yimid ama waa lacaglay ee aan loo meel dayn mustaqbalka inanta kuna kalifaysa wiil kay is jeclayeen inuu dalkii iskaga tago oo uu bada u galo si isna bari loo yidhaa dibada ayuu ka yimid oo waa lacaglay

Waa sheeko aad ka dhehan karto qoraal xeel dheer oo u socota iskugunadaba Xidhidhsan sidii filim oo kale ayna tafatireen qoraayda somalida

Kuwooda ugu Caansani kuna dhehan tahay jacayl iyo murti badani waxanay ku bilaabantay sidan.

Waxay ahayd goor casar gaaban ah abaaro 5:00 galabnimo, cadceeduna sii dhacayso, dhulkuna uu helay roob shuux ah, dhirtuna u badan tahay akhtar

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

ka dharagtay roobkii guga, dadkuna wada quruxbadan yihiin aad modidna inay jawiga wanagsan iyo dadku is heleen.

Waxa magaalada hargeisa ka can ah in ay galabtii dhalinyaradu u soo dhadhacaan suuqa Mustafena waxa uu kala mid yahay dhalinyarada magaalada ,uu soo kacay ,maydhay,labisna kiisii ugu qurxbadnaa soo xidhay waxa uu soo dhaqaaqay goobtii uu ka raaci lahaa buska,goobta oo aad u dad badan dadka xaafadaduna ay inta badan ka racaan baska,iyo basaska oo buuxa ayaa u sahlay in dhalinyaro iyo wayeel ay isku soo gadhaan ,cabaar marki uu soo socday waxa uu soo gadhay goobtii buska ,markii uu in door ah tagnaa ayaa waxa uu isha la helay gabadh ILLAHAY qurux u dhameyay ,cadaaan xigta ,dhubnayn aan burnayna,gabnayn aan dherayna,habka labiskana aad u qurux badan yahay labis isku eeg oo basali iftimaya ah,wali kama uu jeedsan Maryan,lakiin Maryan ayaa dareentay oo yara dhaqaaq joogsatay Mustafe wali wuu ku maqan yahay oo waxa uu jecel yahay in ay is bartaan waayo waxa uu ogyahay in aanay magaalada cidna iska garanayan oo uu dhawaan ka imid magaalada burco ,waxay halkii buska in door ah tagnayeen jeclaana inuu barto inanta lakiin uu ku dhiran wayay inuu lahadlo ayuu imid buskii oo aay raacaday maryan kana buuxsamay mustafe dadka oo dumar u badnaa awgii ,Mustafe aad ayuu uga niyad jabay iyaka oon is baran inay halkaa ku kala tagaan ,baskiii labad ayuu iska raacay isaga oo niyad jabsan hawshii suuqa uu tagay oo ahayd inuu abtigii la kulmona soo dhamaysay ,isla markiiba wuu isa soo rogay oo xafadii ayuu ku soo noqday ,ma uu baydhbaydhin ee waxa uu toos u galay qolkiisii markii uu sariirtii ku jiibsadayna waxa maskaxdiisa ka dhexguuxayay kuna sawirnaa gabadhii uu manta soo arkay ,Mustafe daqiiqado yar ayuu isku badalay kun noqday qof jacayl la il daran ,dareenkiisii iyo ruuxdisii oo dhanina raacaday maryan

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

“Balan maaha jacaylku bandhig laysugu baaqee waa ishaa biligtaada wax bogaaga ku beerma”

Isagoo sidii ah ayuu waaagii u barayay.

Mustafe waxa uu dhigtaa iskulka faarax oomar markii uu u bohoolay jihadii iskuulku ka xigay ayuu goobtii safka iskuulka lagu galayay ku arkay gabadhii uu shalay arkay Mustafe arin ka ga sii daran intii hore oo waxa uu baahi wayn u qabaa inuu helo cid uu lawadaago jacaylkan ku kaliyaysatay ..

Markii uu arkay iyana garatay inuu inankii shalay yahay indhahooduna si toos ah ayay iskugu dhaceen.

Maryan waa fasalka kowaad ee dugsiga sare mustafena laba class ayuu ka sareeyaa oo waa ka saddexaad.

Malintaas markiii uu galay fasalkii waxa uu bilaabamay warwar iyo fakir aad u xeeldheer oo ku salaysan jacayl uu marayan u qaadayy cidna aanay u ogayn waxa uu ku tirabayay erayo jacayl ah,

. Dumar ugu filrooneey,

.dayax Shan iyo tobanaay,

.dahab lagu masaalaay,

.dawadii naftaydaay darayeel naftan

.damqashada dhibaysana

.dareenkaga mooye mid kale maya

Malintaas oo dhan muu dhigan iskuul ee waxa dhamaan jidhkiisa iyo maskaxdiisaba saaqay jacayl ku kaliyay satay, kuna hamiyay inay mar uun is calman donaan.

Markiii uu xafadii tagay qadeyay ,ayaa hadana uu halkii ka bilaabay lakiin imika waxa uu ku fikirayaa sidii uu ku heli lahaa maryan ama meel uu kala xidhidho ,meel dheerna ka ma u donan ee waxa uu la xidhidhay inan ay

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

saxiib yiiin oo layidhaa Faysal oo ay iskulkana isku class yihiin xafadana wada dagan yihiin .

Faysal waa wiil aad u furfuran oo dhamaan dhalinyarada xaafadana ay is yaqanan wiilal iyo gabdhaba.

Markii uu iskuulkii uu soo baxay ayay faysal dariiqa ku kulmeen laysna salaam, kadib indoor ah markii ay kala amusnayeen ayuu mustafe calool adaygay Kuna dhiiraday inu waydiiyo wax cinwaan ah haduu ka hayo maryan madama uu isagu uga war roon yahay, faysalna u balan qaad inuu siin doono marka la rawaxaayo kana cudur daaratay inaanu imika hayn. Mustafe waxa gashay yididiilo inuuu helayo Maryan helayana cid la wadaagta jacaylka ku kaliyaystay.

Rawaxaadii goor ay tahay ayuu Mustafe soo hor istaagay iskuulka oo uu dagdag uga soo baxay sii uu faysal u arko marka uu soo baxo, se waxa uu arkay maryan oo ku dhexjirta hablo badan lays eeg laysna garay lakiin wax wada hadal ahi majiraan inyar kadib ayuu soo baxay Faysal, waxay wada qadeen dariiqa dheer ee loo maro xafadooda, kaftan badan iyo sheeko aad u macaan oo aywada wateen ayaa waxa ka soo gaadhay xafadahoodi markii ay sii kala hadhayeen ayuu Faysal mustafe ku yidhi,

Saxiib waxaad iga sugaysay numbarkii Maryan

Uguna jawaabay Haa...

Saxiib waa Kan ee qoro

Wayahay, 1234567, waad mahadsan tahay waxan abaalakaga ku gudana garan mayo.

Maya saxiib intaas iyo inkabadan ba waa laysku leyahay.

Wayahay saxiib ee jaw waa inoo Bari inshaa Allah.

Farxad aan wayadaa lagu arag ayaad ka dhehan ka raysay wajigiisa Mustafe waxana uu la dhacasanaa sida yare ee uu ku soo helay numberka Maryan

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

ileen qof ay wax ka awood wayni wataan meel walba uu la galaye waxa uu u samray inuu heli doono.

Kadib markii uu gurigii tagay ayuu qadeeyay isagoo faraxsan aad moodidna gabadhuuu u bahnaa inay is heleen ayuu waxa uu tagay sarirtisii waxana uu bilaabay fakir uu siduu ula xidhidhi lahaa ka fikiraayo iyo siduu iskugu sheegi lahaa akhirkiina waxa uu go'aan saday inuu u qoro message kuna sheegto bahidiisa, waxa uu qoray fariintii oo u aad uga shaqeeyay kuna shaganaayo jacaylkiisa kana codsaday inay la qabato ee aanay ku didin .

Markii uu diray fariintii waxa maskaxdiisa ka bixi wayday bila ay la socotaa qof kale amaba aaanay adiga kugu qanacsanayn waxa uu fikiraba waxa uu habeenkaas seexday isagoo aad modid inay ku tidhi kuma rabo amaba kula ma qaban kaarayo jacaylkan.

Marayan waxa ay heshay fariintii uga timid Mustafe, garatay markay akhriday cida uu yahay wiilka u soo qoray fariintan lakiin aanay u lahayn aqoon durugsan wiilkan soo calmaday fikir dheer dabadii waxay nafteeda ku qancisay inay message u qorto ay ugu jawaabayso ,

Walal waan ku salaamay waanan helay fariintaad ii soo dirtay u jedadeedina waan fahamay, lakiin adoon walal wax kale u qadanayn aan ka soo fikiro malinta arabacadana aan kuugu soo war celiyo ok bye.

Mustafe wali waxa uu la ildaran yahay jacayl ku kaliyaystay isagoo aad u fikirayay ayuu niyada iska yidhi,

"Alla dhib badanaa marka uu jacaylku kugu kaliyaysto".

Jacaylku waa wax jiray, jira, jiridonana ilaa inta ay aduunyadu ka dhamaanayso, lakiin dadka ku kal duwan yihiin siyaabaha uu u galo iyo sida loo wadaago, runtiina hadaan jacayl jirin aduunyaduba ma joogteen.

Goor ay fiid tahay ayuu Mustafe helay fariintii maryan akhriyay fahana waxa ay uga jeedo kalmada waan ka soo fikirayaa ,markiiiba waxa uu is

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

waydiyay in ay Maryan cidkale xidhidh la leedahay jacaylki ula ildarnaana uu kusii kaliyaystay waanu kaga sii daray inti hore waayo rajo ayuu qabay markii hore ilaa imikana mid aan dheearayn ayuu qabaa balse waxa uu aad uga fikiray kalmada waan ka soo fikiri doonaa ,habeenkiiyo dhan muu seexan ,warwarka iyo walaaca iyo walbahaarka jacaylku baday ayuu la ildaran yahay wuxuu habeenkiiyo dhan kolba dhinca isku rogo ayuu waagii u barayay isagoon wax niyada u hayna ayuu iskuulkii tagay .

Cida aragataa waxay ka garaanaysay meel dheer inuu is badalay waayo fkirka faraha badani dadka wax ayuu yeelaa jidh ahaan iyo maskax ahaan ba. Wuxuu sidii uga fikiriba waxa uu naftiisa ku qanciyay in uu sugo waxa ay Bari arbacada ula timaado.

Waxa la gaadhay malintii arbacada Mustafena wax jawaab ah wali ma hayo,galabtii markii la gaadhay ayuu mobilekisii eegay lakiin wali wax fariin ah ma hayo .waayaha aduunyadu farabadanaa imisaa will dhalinyaro ah jecel gabadh gabadhuna will kale wiilkuna gabadh kale ,aduunyada dhamaanteed ayaa ah iskadaba wareeg jacaylkuna waa shay ka qiimo iyo qaayoba badan in lays khiyaameyo ama been laysku maweeliyo ,jacaylka runta ahna sida lagu helaa way adagtahay waayo marwalba qof ayuu ku soo horeyaa lakiin kii la jeclaaday sida lagu helo ayaa adkaata .

Mustafe wuu isbadalay misaankii dhamayska tirnaana wuu yaraaday waxa ka soo dhadhacay fikirkii faraha badanaa iyo jacaylkii uu la daala dhacayay goor ay fiid tahay ayay Maryanoo ilaa shalay ka warawasanayd waxay ugu jawaabi lahayd soo qaaday telephone keedii waxayna u qortay fariin dreenka ay ka qabo ugu gudbijnayso waxaanay ku bilawday ,

Walal Mustafe waan ku salaamay igana raali ahow hadaan kaala ragay jawaabta lakiin waxan filayaa inaad ku qanci doontid, walal amaba gacaliye silamida sida dareenka jacayl aad iigu qaaday ayaan ana

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

kuugu qaaday ,runtiina aragtidaada wan ku qancay una bogay waxaanan ku han wayanahay inay inoo bilaabanto nolol cusub oo ilaa heer mustaqbal ah kana dheer maaweelo iyo wakhti lumis .

Aniguna waaxaan ku balan qaadaya in aan inta noloshayda ka hadhay aan adiga nolosha kula qaybsado.

Jacaylku waa dareen xoogan oo qofka bini aadmig ah ka xoog wayn inuu kaan taroolo, ama lado hurdo qofka uu jantay la, aantis ama uu farxo farxad niyada qofka uu jantay la, aantis.

Waa dareen dhib badan oo qofka warwar iyo walaac faro badan ku abuura kuna mutaysto dhibaato hadii uu waayo ruuxa uu jeclaaday kuna kalifaysa xataa dhimasho iyo inuu iska naco aduunyada ,qofka uu jacaylka dhabta ahi hayo uu ka sooma farxada ama cuntada kaliya waxa u muuqda waa ruuxa uujantay ,farwal oo uu dhaqaajiyana waxa uga dhex muuqda ruxaas .

Mustafe wuxuu malintiiyo dhan sugaba goor ay fiid dandeed tahay ayuu halay fariintii maryan ,garay ,dadag inta uu ula orday ayuuu qolkiii la tagay si aad u taxadar badana u akhriyay,markii uu soo gaadhay walal amaba gacaliye ayay neef badan ka soo booday isla makiiba waxa galay fifircooni aan wayadaa lagu arag waxa uu imika u diyaar garoobay inuu la hadalo oo ay Telephone ka shekaystaan madaama imika ay labadooduba raali isku yihiiin habeenkaasna umay suuro galin inay wada hadlaan lakiin habeenkaas waxa uu seexday Mustafe hurdo aanu waayowayo seexan farxad badanina ku dhehan tahay aroortina waxa uu kacay isaga oo aan dhinacna isku rogin habeenkaas .

Goor ay casar tahay ayuu telephonekii soo qaatay oo hawlihisii oo dhana uu soo dhamaystay isaga oo aad uga warwar san waxa ay kuwad hadli donan iyo sida ay u soo dhawayn doonto marayan ayuu qaday telkiii kadibna

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

garaacay nuberkii Maryan, una dhac qadar yar dabadii waxa ka qabatay Marayan garatay inuu Mustafe yahay,

Hallo”

Ayay tidhi markaasu ugu jawaabay

Hallo” walal Maryan miyaa

Haa,

Ii waran walal xaladaada cafimaad iyo wayahagaba.

Aad baan u ficanahay macaan adiguna

Aad iyo aad alxamdulilaah

Markii ay intaas is waydarsadeen ayuu Mustafe hadalkii qaatay oo yidhi;

Maryan waad ka warhaysaa arinkayga runtiina waxaad tahay qof aan u bogay, aadna waan kuu jecelahay taas oo ay tahay had iyo jeer naftayduna jeceshahay in aad I dhinac joogtid runtiina Maryan isagoo cod hoose ku hadlaaya ayuu yidhi

I love you Maryan

Maryan way yaabtay jacaylka intan gaadhsiisan ee mustafe ku kaliyaystay mudada waxay ugu jawaabato ayay garan wayday iyadoo hadalki ku dhagdhagaayo ayay tidhi,

Een…een… Mustafe sida aad iii jeceshahay iyo sii kasii wanagsan ayaan kuu jecelahay

Markuuu intaas maqalay ayay neef uu hiin raagay ka soo booday isagoo hadalkii sii watana waxa uu yidhi,

Macaan Maryaneey anigu waxaan doonayaa inaan kula samaysto nolol heer mustaqbal ah markaa waxan kaa codsan laha haday jiraan wax anan ogayn in aad imika ii sheegto inta ay goori goor tahay.

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

Maya gacaliye anigu cidkale oo ay wax naga dhexeyaan ma jirto aan adiga ahayn waxanan kuu balan qadayaa inaan inta noloshayda ka hadhay aan agtaada ku dhamasto.

Mustafe waxa gashay yididiilo aad u xeeldheer oo jacayl dhab ah.

Markii ay intaas Maryan tidhi ayuu hadalkiii ku soo noqday,

Xabibi malaha inbadan ayaynu wada hadlaynay ee goorma ayaynu ka dhiganaa balankeena kowaad

Maryan oo aad marakan moodid in ay jacaylkii u soo dadagtay ayaa qabatay balankiii oo tidhi,

Macaan mustafow Bari shanta galabnimo maxaad ka qabtaa

Waxba ee halkee ayaynu iskugu nimaadnaa

Huteel barwaaqo qaybtiisa danbe ee beerta,

Wayahay gacaliso aad baan ku jecelahay

Waayahay gacaliye ana sidoo kale aad baan kuu jecelahay

Jawigu qurux badanaa roob ayaa qaaday in yar ka hore dadka badan kiisu waxay u badan yihiin dad ku la bisan dhar wada qurux badan iyo cadceeda oo faladho dhadheer oo casaan xiga bixinaysa qofka midabkiisana ka dhigaysa mid aad u nuuraya huteelka ay ku balameena waa mid wada dhir akhtar ahi ku taal mutulo lagu cunteyaana ka buxaan waxay Maryan oo aad moodid in aanay waxba la hadhin sidii ay u raali galin lahayd jacaylkeeda ayaa soo horeysay dharna kii ugu quruxda badnaa soo xidhatay cadarka ka soo uraayana ud goonkiisa ay dadka ag marayaa oo dhan ayuu saaaqay quruxdeedana malintaas qof arkay ayuun baa ka warami karaaya xiisaha ay u hayso jacaylkeeda ayaa aad ugu dheer iyo waxay uga sheekayn doonto ayay ka sii fikiraysaa iyadoo kolba isha ka khawisaysa saacada ayuu Mustafe ka soo galay albaabka danbe ee huteelka markiiba indhahooda ayaa is qabtay intii uu soo socday ayay niyada iska tidhi

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

Alla wiilku qurux badanaa

Mustafe malinkaas qofkii arkaa waxa uu modayay inuu caawa arooos yahay dhisnida jidhkiisa iyo labiska oo is helay dartiis markii uu soo dul istaagay ayay salaan aad iyo aad u kalgacal badan oo laba is jecel is waydarsadaan dhab isku siyeen markiibana wada fadhisteen siday u shekaysanayeen waxaad moodaysay qaar ilaa waligood is yaaqaanay lakiin waa kulankoodii kowaad mustafe oo aftahanimada u dhashay ayaa sheekada furfurayay oo Maryan in yar oo xishood ah ayaa ku jiray dadka ag Maryana waxay arkayeen oo kaliya labada qof ee qoslaaya waxay sidii u shekaysataan ba waxay malinkaasi uu ahaa malin ay beerta midhaha ku gurteen si ay ugala baxaan markay bisladaan jacaylkunaa wanaagsanaa raaxo badanaa lagu dagi ogaa marka labada qof raalida isku yihiin mustafe waxa uu dhibkii ka soo gadhay jacaylkii ku kaliyaysaty ku ilaaway kulankan faraxadii iyo kal soonidi ay u muujisay maryan

Maryan oo madaxa hoos u dhigaysa xishood jacayl dartiis ayaa heestan ku heestay waliba ku luuqaynaysa,

“Galgacaylku waa qani caashaqa ka qaro wayn

Quruxiyo wanaag badan

Waana shay ku qaaliya qimaynta aadmiga

Labadaysla qaatan qalibigooda Kama ba’o”.

Bisaylka ay jacaylka u bisladeen ayaaa kulanka laga dhadhan sanayay layskuna balan qaad in aan wad mooye wax kale kala kaxayn mustafe oo gabogabadii kulankaas la hadalayay Maryan ayaa yidhi

Maryaneey noloshayda inta ka hadhay lagama yaabo in aan meel kale kaaga baydho lakiin wax walba adigaaa ayaa iga samayasan karaya oo ishaad ii mujisid ayaan kula nolaanayaa waligayna waan ku jeclaan doonaa

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

Hadalka Mustafe oo u badanaa afeef dhigasho iyo dardaaaran ayaay Maryan oo taxadraysaa kaaga jawaabatay

Naftayda waxaad ku abuurtay dareen jacayl oo aanay waligeed arag marwalbana xagaga ayan ahay kuna balan qadayaa runtiina waan ku jecelahay

Goor ay tahay fiid cawl ayay kala tageen iyagooo gacmaha is haysta kalgacayl badana isku muujinya.

Xiisuhu inta uu cusub yahay labada qof ee is jeceli waxa caado ah in ay soo ban dhigaan dabeecado aad u wanaagsan iyo hab dhaqameed laysku raali galinaayo Mustafe iyo Maryana kamay madhnayn habdhaqameedkaa nololeed ee cadada u ah bani aadmiga.

Kulan koodaasna waxa uu samayn wayn ku yeeshay Marayn oo sheekadoodii macaanayd iyo kaftanki Mustafe ilaawi wayday habeenkaas oo dhana cajaladeeda xusuta ayay ku soo celceshaynaysay faraxdii kulankaas ka dhacday marwalbana waxay ahayd mid ka fikirta oo jeclayd in ay is ag jogaan daqiiqad walba.

Jacaylku waa dhibaato badan yahay marwalbana sida uu dadka ku galo lama yaqaano oo waxa la arkaa uun isagoo qofku la iladaaran jacayl Maryana sidaas ayay ahayd goorta uu Mustafe u soo bandhigay jacaylkisa iyo siday raalida ugu noqotay ee ay jacayl ad u xoog wayn u qaaday may garanayn waxaanay marwalaba ka caban jiratay kulan kooda oo yaraa awaadii Mustafe taasi waxay ku noqotay laf dhuun gashay oo waxa uu ahaa mid marwalba isku daya inuu raali galiyo gacalisadiisa waxaana la gadhay kulankoodi labaad waxay ku balameen guri ay inan maryan asxaab dhaw yihiin oo hinda layidhaa dagan tahay waxaanay kul meen habeenkaas iyagoo aad moodid in ay isku soo halilayaan xiisaha jacaylka dartiis

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

Mustafe waxa uu garaacay gurigii waxaana si dagdag ah uga furtay Maryan oo ka garatay shan qadh yaraan tiisa inuu isagii yahay markiibana salaan aad u kalgacal badan ayay kula booday waxaanay soo dhawayn diiran kadib fadhisteen qolka fadhigaa oo habeenkaas u eeka inuu yahay qol loogu talo galay laba is jecel waxa wada cas ee yaal awgii

Waxay habeenkiiyo dhan sheekaystaan waxa sharaab albaabka kala soo gashay Hinda oo aad u xishoonaysa waxaanay ku bilowday

Salaamu calaykum walal

Wacalaykuma salaam

Maryan oo ka faaidaysanaysa salaanta wanaagsan ee Hinda ayaa tidhi

Wow! Salaam qurux badanidaa kaalay aan iskiin baro hadabee wiilkan kolay warkiisa waad haysaaye

Hayga khajilsiin ee igaa daa Maryan

Wiilkan waxa layidhaa Mustafe wana kaanu nolosha waadigi doono hadii alle isku kayo simo

Marki ay intaas tidhi Maryan ayay Hindi iska baxaday waxaana hadalkii la wareegay mustafe oo yidhi;

Inantii waad ka xishood sisay

Maya ee waan is kiin barayay oo kaliya macaaan

Wayahay inta uuu yidhi ayuu ku yidhi;

Hadaaan caawa ku yidhaa ii cadee inaad I jeceshahay maxaad iigu cadayn lahayd

Inta ay cabaar fikirtay ayay ku tidhi;

Indha isku qabo anaa kuu cadaynaaya jacaylku halka uu iga gaadhsisan yahaye

Mustafena isku qabtay ayay

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

Dhunkasho aad u naxariis badan ka dhunkatay labada dhaban iyo sujuuda marakasay ku tidhi kala fur indhaha hadaba si aad iigu sheegtid intaa aan ku jecelahay ileen adaa cabirayaye

inta uu aad eegay indha Maryan ayuu heestan isagoo ku lu qaynaya ku yidhi;

Damiir hal adeegnimiyo
quruxda lagu daahayee
darandar indhii arkaan
marnaba daymada kadaaline

timaha kala degay dusheediyo oo
ilkaha dabarkaley dilee

waxaan dumar daydayoon
mid iidana raadiyaba
hadaan taan doonayee illaahay
kaducaysan jiray
anagu dejiyeyshelnee
rabbow isu kaaya daaa

dadnimo dhaqankeeda iyo
quruxda lagu deyrayee
dadkaba ruuxaysbartaan
kolnaba diiqad aanan gelininee
degeni socodkeeda iyooooo ooooooooo

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

dibnaha madowgaleey dileeeee

waxaan dumar daydayoon
mid iidana raadiyaba
hadaan taan doonayee ilaahay
kaducaysan jiray
anagu dejiyeyshelnee
rabbow isu kaaya daaaa

Jacaylkaagu waxa uu ila mid yahay si aanan qiyaasi karayn hadaan ku idhaa waxanku qiyaaso ma garanayo maad ila yaabi macaan runtiina waxan ahay mid daradaa la il daran jacayl aan jacelaahay inuu midha dhalo

Xiisaha jacaylka ee dhex maray kadib waxa ay dib u bilawdeen sheeko aad iyo aad u xiiso badan, xiisaha jacaylku ayaa laga dheehan karayay labadoodaba habeenkaas marwalbana waxa ahayeen qaar isku niyad san oo aan hadalka lakala khajilayn dareenkooduna uu isku mid ahaa raalina kuwad ah in ay nolosha wadagaan ilaa ay ka gaadhsinayaan heer mustaqbal oo intifaac leh iyo nolol wanagsan leh

Kulankan oo jawi Dagan ugu dhamaday oo aad iyo aad u heer sareeya kan xiisoo iyo xamaasadd badnaa kuwoodi hore

waxay sidii ahaataba waxa Maryan iy Mustafe jacaylkoodi ogaaday dhamaan dadki xaafada iyo dhalinyaradiiiba waxaanay noqden dad lagu sheekaysto marwalaba oo la soo hadal qado midkood waxay sidaa ahdaana waxa ogaaday akhirkii xaafada Maryan oo ah dad lacag lay ah kana xumaa in inantooda lagu arko inan yar oo aan waxba haysan si ay taas uga hortagaana waxay Maryan u sameyeen wakhti cayiman oo aanay dhinacna u dhaafi Karin lakiiin laba is jecel isku raali ah dadkoo dhana iska xushay ma wayaan si ay ku kulmaan waxay kulmi jireen malin walba marka nusasacaha

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

iskuulka la gaadho jacaylkooduna waxa uu ahaa mid sii xogaysta ee aan waxba u noqon turturo walba oo loo dhigo kuna qanac sanayeen in ay dhib iyo dheefba wadagaan ilaa inta ay ka midho dhalinayaan Maryana waxay ahayd mid marwalba telephonka kala soo hadasha Mustafe iyadoo ka cabanaysa sida loogu didaayo inay guriga ka soo baxdo waxaanay marwalba ku oo dhan jirtay

“Marwalaba ka fikirkaaga ayaan la ildaranahay iyo sidaan kula kulmaayo waxaan jecelahay in aan kula kulmo malin walba iyo xili walba macaan”

Waxay saamyan wayn ku yealaatay hadalkaasi dabecadihii Mustafe iyo dhaqankiisii iyo fikirkiisiiba waayo waxa la qayb satay maryan su’aalaha marwalaban maskaxdiisa ka dhex guuxayay waxay ahayeen qaar ku salaysan mustaqbalaka iyo nolosha ay wadaagi donan Maryan waxaanu ku tirabi jiray heeso jacayl ah

“Gabadh yahay kalgacalbaad
goortaan ku eegoba
qalbigayga gelisaa
waxse aanan garanayn
ii gunuday caashaqe
halka aad i gaadhsiin”

Arin wuxuu sidii ahadaba waxaa lagaadhay fasaxi iskuulka Mustafena waxa uu u sheegay Maryan inuu doonayo inuu booqdo xafadodii kana soo war helo markii uu intas maryan telephone uga sheegay ayay ku balameen inay caawa is arkaan si ay isku sii maca salameyaan

goor ay tahay 9 habeenimo ayay ku kulmeen meel aan sidaa uga durug sanayan guriga Maryanyo waxaanay fadhisteen meel aan laga arki karayn waxaana u bilaabantay sheeko ku salaysan jacayl ay doonayaaan inay ka midho dhaliyaan iyo dardaran mid walbaa kan kale la si dardaarmayo inta

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

lakala maqan yahay afka Maryana waxa ka soo baxayay habeenkaas erayo jacayl oo aad u xiiso badan

ku jecliyaa dadkana kugu jecliyaa runtiina waxan ka warwarayaa sidaan u nolaan doono adiga la'aanta marwalbana waxan ahaan doona mid adiga uun kaa fikirta runtiina waan ku jecelahay

Mustafe oo aad u dareemay siday gacalisadiisu uga xun tahay tagitaankiisa ayaa yidhi,

jacaylkaaga iyo lajoogaguba waxay nafatayda u yihiin farxad aan la soo koobi karayn marwalban markaan ku arko ayaan dagaa oo ay naftaydu kugu xasishaa lakiin runtii intaa aan maqanahay u malayn mayo inan nolol dagan ku nolaan doono waxanan kugu la dardarmayaa inaad jacaylka halkaaga ka sii xejiso dhib wal oo uu kugu qaatona aad u samirtid waayo samraa ayaa sadkii hela ,dartaa waxan ahay mid aan garanayn waxan adiga ahayn naftayda jacaylkaagu waxa uu ka dhigay mid aan jiif iyo joogba aan xamilayn cuntana aan cuni Karin talaabo wal oo aan qaadana adigaa ayaa iiga dhex muuqda markaa waxan macaan kaa codsan lahaa in aan soo noqdo jacaylkeena oo halkiisiya aadna waan kuu jecelahay'

Maryan oo ahayd dhagayste fariin jacayl iyo waano iyada ku soco ta ayaa aad daremaysay ilmada indhaheeda ku soo taagnayd ayay tidhi;

gacaliye balan daro waa diin daro aniguna waxan kuu balan qadayaa inaad igu soo noqoto anigoo wali sidaa kuu ah kuna jecel waligayna ku maan hamiyin nin aan adiga ahayn inan nolosha la wadaago una malayn maayo inuu I calman doono qof aan adiga ahayn inshaa allah waxan kuu rajayanayaa inaad soo noqoto adigoo nabada reerkina kaga soo waranto nabad qab badan iyo barwaaqo marwalban anigu waxan ahaan donaa mid adiga ku sugta

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

Kadib wedhahaas jacaylka iyo balanta isugu jiray waxay ku balameen inay aroorta ugu timaado istaanka laga raaco babuurka.

Habeenkaas waxa uu ahaa habeen ay wadageen jacayl aad u xeeldheer oo mid waliba intii uu jeclaa Kan kale libin laabkiis ay is sii jecladeen runtiina aad modaysid inay jacayl dartiis habeenkaas isku dul ooyayeen sida ay iskugu niyad samayeen

waagii markiii uu baryay Mustafe waxa uu u xamaan uruursaday dhinacaa iyo istaankii maryana goor horeba way soo jarmaaday waxaanay ku kulmeen istaankii markiibana gaadhi dhaqaqaya aayuu helay inta uu shandadii soo dhigtay gadhigii ayuu maryan u soo noqday markaasu ku yidhi isagoo Maryan ku bilaabay waano kana cabsi qabay in jacaylkiisu ka baydho tubtii saxda ahayd waayo sida lagu helo ayaa aadag jacayl kan oo kale ah oo raali laysku yahay dhib iyo dheef la waadaago marwalba lawada faraxsan yahay waxanu hadal kiisu u badnaa waano iyo dardaran jacayl waxaana hadaladiisi ka mid ahaa

Runtii waxan jeclahay in aan nolosha wadaagno kana midha dhalino riyadeena ah in aynu nolosha wadaagno iskuna noqono xaaji iyo oridiis markan soo noqdana waaxan kuu balan qadayaa in aan hore u sii socono waxanan kaaga tagayaa xubidaydaay amaano jacayl oo aan wada beeranay kuna soo noqdo adigoo nabad iyo caano ah

iasgoo hadalkii wada ayuu gadhigi hoonkii u tumay is maca salameyeen iyadoon Maryan walilahadlin jecelna inay la hadasho oo ay kal sooni badan oo jacayl sii gashato waxaanay halkii tagnayd ilaa intii uu gadhigii ka sii qarsoomayay iyadoo kolba u gacan hadinaysa isna uu daqada uga soo gacan hadinya isagoo ku daraya in uu gacantiisa dhunkado hawadana u soo raaciyo iyaduna sidoo kale waxaanay halkii ka soo dhaqaaqday Maryan iyadoo aad modid in ay tabcaan tahay oo aan dhaqaqi karayn waxaanay malintaasi u

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

ahayd malin ay aad u murugaysnayd kuna hamiyaysay jacaylka curdinka ah inay gaadhsiso heer ay wadagaan nolosha dhamanteed balse ay kari kari wayday, wayadaas oo dhana may ahayn mid si wanaaagsan u seexta oo waxay ka fikiri jirtay uun Mustafe iyo goorta uu soo noqon doono waxay ahayd mid marwalba dhawrta jacaylkii ay Mustafe u haysay .

Qaybtii labaad

Sanad walba xiliga xagaga waxaa magaalada ku soo xagaa baxa dadka ka yimaada Yurub iyo America inta badana goobaha waxbarashadu waa fasax xiligaa ,sidaas darted magaaladu waxay ciriciraysaa dad oo waxa buux dhafiyay dadkii soo xagaa baxay iyo ku wii waxbarashda fasaxa ka ahaa .

Siciid waa wiil ka yimid cariga ingiriiska waxaanu joogay magaalada mudo week ah waa lacag lay wakhtigiisa oo dhan ku qaata iska meermeer iyo ku raaxaysiga lacagta uu kala yimid qurbaha,

Aroor arooraha kamida isagoo wata babuurkisa ayuu soo hormaray guriga Maryanyo waxa uu isha qalac ku siyay Maryan oo biyo ku dadinayasa dibada gurigooda aadna aan u asturnayn oo shaqo ayay ka haysay guriga markay aragtay ninka ku soo maqan ayay dagdag intay biyihii u dadisay guriga u gashay siciid oo iska tamashlayn ku joogay waxa u ka helay Maryan iyo quruxda ALLE u dhameyay markiibana waxa uu ku dadaalay cid uu kala xidhidho waxa uu helay inan ay saxiibo yihiin oo gala guriga Maryanyo ka soo horjeeda oo layidhaa Deeq markiibanA uu telephone u diray isaga oo leh.

Saxiib waan kuu bahanaahay ee goorama ayaynu is araganaa;

Ma wax cusub ayaa soo kordhay Siciiid

Maya ee arin yar ayaan kaaga bahanaa markaa goorma ayaan kuu imadaa

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

Caawa waxan iskugu imanynaa suuqa

Wayahay saxiib ee 7 haynoo ahaato

Ok

Kadib habeenaimadiiba waxay ku kulmeen goob ay dhaliyaradu ku badan tahay markiibana waxay iskula baxeen meel gaar ah oo aanay cid maqalayn waxay ku shekaysanayaan waxaana hadalkii bilaabay siciiid oo yidhi;

Saxiib Deeq waxaa maaanta iga ka soo gashay arin ee maad ii fulin ka raysaa hadad karto;

Haa maxaa dhacay manan saxiibkaa ahayn maxaad sidaa u leedahay ii sheeg

Saxiib waxan manta arkay inaanta gasha guriga kaa soo horjeeda markaa waxan doonayaa inaad ii soo gacan galiso saxiib ama aad ii qabato waxii karaankaaga ah.

Kadib markii uu intaas yidhi ayuuu Deeq gartay inanta uu ka hadlaayo Siciid waxaanu ku yidhi;

Saxiib Siciidow inantaa soo xero galintedu way adagtay maxaa yeelay saxiib waxay wada socdaan wiil Mustafe layidhaa oo dadka oo dhan ayaa isku og markaa saxiib inan telephonekeda ku siiyo mooye wax kale kuuma qaban kaaraayo.

Markii uu intaas yidhi ayuu siciid oo ka xun in ay wiil la socoto Maryan yidhi;

Saxiib waad mahadsan tahay sida wanaagsan ee aad wax iigu sheegtay markaa saxiib waxan ku sheegayaa anigu arin aan guur ahayn Kama lihi ee kaliya waxan doonayaa inaan guursado gabadhaasi saxiiib

Deeq oo ku dhirigalinaya arinka guurka ayaa isagoo og in anay Maryan yeelayn ayuu ku yidhi;

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

Saxiib u malayn mayo hadaad iyada ula tagto arinkaas inay kaa yeelayso lakiiin saxiib xaga walidkeed ka wareeg waayo adigu waxaad tahay nin dibada ka yimid dad ka dibada kayimadana halkan aad ayaa looga qadariyaa. Siicid isla markiiba yididiilo ayaa gashay waxaanu yidhi

Wayahaya saxiib ee hawshaas ayaan gudo galayaa wanad mahadsan tahay aynu iska war haynona

Kadib markii uu siciid warbixin dhamaystiran ka helay Maryan ayuu isku dayay inuu kala hadlo mobile keeda lakiin waxay ahayd mid ku jarta ama aan ka dhagaysan waxa uu leyahay dhibaato ayaanu kala kulmay oo xataa fariimaha uu ugu diro SMSka kama ay so jawaabi jirin waayo waxay ogayd balankii iyo dardarankii adkaa ee Mustafe marwalbana waxay ahayd mid la il daran jacaylka Mustafe oo aan qaadi karayn qofkale iyo jacaylkale toona samraana sadkii wuu helaa Maryan habeena kumay seexan in loo aqal gayn doono nin aan ahayn mustafe lakiin Siciid markii uu Maryan dhinacna uu qadi wayay waxa uu ka wareegay xagii uu saxiibkii u sheegay ee ahayd inuuu xaga walidkeed ka wareego waxaanu durbadiiba u sheegay abihii in uu doonayo in uu guursado inanta Xaaji Ibraahim ee Maryan layidhaa, markibana aabihiii uu soo dhaweyaya kuna faraxay arinkaas waayo Siciid muu ahayn nin laga filayay guur iyo wax u dhow toona maxaa yelay dhawr xagaayoo hor ayaa lagala quustay,abihiii Maxamuud cali waxa uuu markiiba bilaabay in uu la xidhidho cida ugu dhow ee arinkan ka cawin karaysa iskuna wanaagasan yihiin Xaaji ibrahim waxaanu helay oday cali oo ay asxaab dhaw yihiin Maryan abaheed una sheeg arinkii waxaanu ka codsaday in uu arinka dadajiyo oo caawaba uu xaajiga u ban dhigo balan uga soo qabto in malinta khamiista ah ay inanta soo donayaan hadii ay raali ku yihiin,isla habeenkaasba waxa uu Oday Ismaciil u tagay Maryan abaheed kadib ayuuu Xaaji ibraahim yidhi;

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

Waar xiligan maad socon jirine caawa maxaa jiray

Waxba ee arin yar ayaa soo kordhay oon kula imid

Bal ii sheeg

Yaanay dhibaato noqon ayuu ku ducaystay

Manta waxaa halkii shaqada iigu imid Maxamuud Cali oo iga codsaday in aan arinka uu kaa lahaa u galo markaa horta sidaasan kugu yimid arinkuna waxa weeyan inankiisii dibada ka yimid ayuu u doonayaa inantada Maryan markaa malinata khamiista ah ayay doonayaan in arinku dhacoo.

Xaaji ibraahim mayaba kama uu soo celin ee waxa uu yidhi

Waa sax waana arin wanaagsan ee sidaa hayno ahaato .

Maryan wali waxay la ildaran tahay jacayl uu ka maqan yahay aktarkii la jilayay waxayna wakhtigeeda badankiisa ku qadataa qolkeeda iyo fikirka iyo aramida jacayl ee soo ridatay ayay la kici kari laadahay ilaahayow qof aan waxab ogayn ha cadaabin ,halkan guurigooda dhexdiidsana waxaa lagu bixinayaa iyada,iyadoon waxba laga waydiin ayuu abaheed iyo hoyadeed isku raceen in la siiyo wiil aanay is garanayn xaataa anay isku dabeecad wada noolanshiyo dhex mari Karin waayo waxa uu ku barbaaray Siciid wadanka uk inta badan halkan waxan dhawr usbuuc ahayn muu iman jirin.

Waxa soo dhawaatay malintii balantu ahayd waxaanu abahed u sheegay Maryan hoyadeed Cawo inay inta ka horaysa khamiista ka dhadhiciso inanta guurka oo ay ka sii ogalaysiiso lakiin war uma hayo inay la sooco to mid hadii raga oo dhan lasoo safo ay isaga uun qadan lahayd waxwal oo uu yahayba Maryan hooyadeed oo sidii loo shegay yeelaysa ayaa ugu tagtay qolkeedi iyada oo iska dhex fadhida waxaanay ku tidhi;

Maxaa ku helay eed lajiiftaa uun horta

Waxba, waxba hooyo!

Soo kac oo igu kaalay fadhiga soona dhakso arimo ayaa ii yaale

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

Marki ay intaas tidhi ayay dagdag u saro kacday ugana dabatagtay Maryan niyadeeda marna may soo gashan guur iyo wax lamida toona lakiin maskaxdeeda waxa ka dhex guuxayay Mustafe iyo siday ugu bahan tahay qadar yar dabadiina waxay ka daba tagtay hooyadeed intii anay fadhiisan ayay markiiba tidhi;

Hooyo maxaa cusub ee aan kuu qabtaa

Waxba ee soo fadhiiso arin baan kuu hayaaye

Wayaahay ee maxaa jira hooyo

Hooyo Maryaneey waxa lagaadhay xiligiii aanu ka fikiri lahayn mustaqbalkaaga iyo ciddad la waadaagi doonto markaa hooyo aniga iyo aaboba waxaanu kula jeclaanay wiil uu dhalay oday Maxamuud Cali oo dibada ka yimid markaa hooyo khamiista ayuu ku soo donayaa ee sidaa ula soco hana nagu didin hooyo oo duco naga qaado

Markii ay intaas tidhi ayay Maryan qaracantay oo ay hadli Kari wayday iyadoo aad modid in ay beerka ka naxday sida ay u hadli Kari layd ayaa tidhi

Maa nigaa la isoo donayaa…!

Haa ee hanagu didin hooyo

Maya maya maya!! Anigu Nin anan garanayn wax uu yahay ma guursanaayo aniguna ma joogo xiligii lay doori lahaa qofka aanu nolosha wadagayno hooyo ee iga daaya ma doonaye;

Maryan hooyadeed oo hadalka ku kulaylinaysa ayaa tidhi

Nayaa waan garanayaa waxa aad doonaysid inan yar oon nafitiisaba ku filnayn ayaad doonaysaa inaad raacdo ma abahaa iyo familgina ayaad doonaysaa inaad sharaftooda meel kaga dhacdo taasi suuro gal maaha,

Maryan oo naxsan ayaa tidhi

Hooyo sharaftiina meel kagama dhaacayo inan nooleeyo mooye lakiin Hooyo hadaan anigu raali ku ahay in aan nolosha la qaybsado wiil aan aqaan

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

wuxuu gudi karo iyo wuxuu fali karaba maxaa ii didaaya ee I raacinaya nin anan garanayn wax alle wax uu yahay hooyo lacag iyo dibadba waa laheelaa lakiin sida lagu helo ayaa adag laba qof oo raali isku ah jecelna inay nolosha wada wadagaan

Markii ay intaas tidhi ayay Maryan hooyadeed ka cadhootay sida Maryan aanay u qarsanayn jacaylka Mustafe ee ay raalida ku tahay waxaanay ku tidhi

Anigu kuma garanaayo halkaad ku socoto ee caawa abahaa ha yimaado!!

Maryan talaa ku cadaatay waxaanay aad u ixtiraamtaa abaheed mana jecla in ay hadalka ku celiso lakiin waxa kaga sii daran in uu abaheed arinkaa ula yimaado iyo siday uga bixi lahayd waxaana la gaadhay habeenkii markii uu abaheed soo hoyday ayay hooyadeed u sheegtay waxay Maryan kala kulantay isagoon dhincna eegin ayuu Maryan oo qolkii ku dhex akhrisanaysa buug jacayl ah inta uu ka gundhiyay gidaarka ka jaray kuna yidhi isagoo si adag ula hadlaaya

Waan hayaa warkaaga inaad doonayso inaad sharaftayda dhulka la gasho oo aad raacdid wiil aan waxba haysan oo aan naftiisaba ku filnayn oo aad diiday waxan aniga iyo hooyadaa kuu soo goynay, imikana waxan kuu sheegayaa inaad soo kala doorato duco waalid iyo haabaar waalid

Maryan oo aan aabaheed waligeed hadal ku celin ixtiraam dartiis ayaa ku tidhi;

Aabo maan aaniga waxba layga waydinayn guurkayga lakiin sideed iigu quudhaysaan Nin aanan garanayn wax uu yahay wax naga dhexeyaana aanay jirin

Iyadoo hadalkii wadata ayuuu ka dhex galay abaheed markaasu yidhi

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

Hadii aad dhago leedahay anigu khamiista waan ku bixinayaa hadii aad diidana gurigana ii dhaaf cidaad jeceshayna raac waligana habaar waalid ayaan kugu ogahay.

Qofna ma jecla inuu qof aanu nolosha lawaadagi Karin uu la nolaado qof wal oo bini aadmi ahina waa u xor cida uu la wadaagayo nolosha oo waxaan u doori Karin walaa waliid walaa cid kale lakin waxa lagu leyahay talo iyo in la waaniyo.

Maryan oohini way u dhamaatay habeenkaas oo dhana iska daa inay hurdo seexato ee waxa indhaheeda ka qubanaysay ilmo aad moodid in uu dhiig ku jiro wajigeedana barar dartiis uu la buurnaaday kana luntay quruxdii sariirtii uu abaheed kaga dul tagay ayay wali ku jiiftaa sidii baanu waagii ugu barayay iyadoon afka markaliya isku qaban beerkana ka oyaysa iyo siday wax ugu sheegi doonto marka uu Mustafe yimaado waxana maskaxdeda ka dhadhici la sida dad cidii ugu dhawayd ee ahaa abaheed iyo hooyadeed ugu qudheen in ay nolosheda la qaybsato cid aanay garanayn .malintii la soo doonayay waxa ka hadhay barii oo kaliya dhamaan dadki xafaduna way ogadeen oo waxay la yaban yihiin guurka aanay inantu raalida ka ahayn ee hadana lagu khasbaayo lakiin waa wax ka dhaca inta badan dhulka soomalida oo hablaha la siiyo wilal aanay garnayn oo lagu siinayo dibada ayuu ka yimid iyo lacag ayuu leyahay aan loo meel dayan waxa hadhow ka dhalan karaya malintaas oo dhan muruugo iyo ciil dartiiis ayay hadli kari la'ad waxaanay ahayd mid siidii sakaraatul mawt hayo hadal daysay oo yaalin ku dul ah sariirta,xafadoodana waxaa ka socotay hawl adag oo loogu diyaar garoobayo bixinteeda,hooyaded waxay u yeedhatay xigtadii oo dhan iyo dumarkii ay iskugu dhawayeen abaheedana aderadeed iyo abtiyasheed ayuu u yedhay sii ay goob joog ugu ahadaan bixinta inanta waxa lasii

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

xamaan uruursadaba waxa la gaadhay malintii arbacada arin oo dhamina waa u diyaar reerka inanta iyo reerka inankaba .

Manta waxaa bil laga jogaa mailntii iskuulka la fasaxay ee uu mustafe tagay reerkoodii waxaanu soo noqday isaga oo aad u sii quruxaystay dhulka oo barwaaqo ahaa dartiis soona caano dhamay waxa uu magaalada soo galay abaaro 9 subaxnimo isaga oo dalana dartiis markiba waa uu iska seexday qadadii markii uu u kacay qadeeyayna ayuu la hadlay Maryn sidii cadada u ahayd awalba Maryan markay aragaty numbarkii Mustafe ayay isla markiiiba garatay inuu yimid iyadoo aad u naxsan dhinacna ka faraxsan ayay tidhi

Hallo

Hallo Maryan maa ii fican tahay macaan

Haa aad baan kuugu fiicanahay ee ii ga waran xaladaada iyo sidii lagu ahaa reerkiiiba

Aad baa gacaliso loogu ficnaa ee adna ii waran bal side ayad tahay iyo noloshadaba

Macaan anigu waan wacanahay arina sidad ku ogayd wuu iska badalay ee telephone kaagama sheegi karayo ee caawa iigu kaalay gurigii Hindiyo

Waayahay ee ma wax dhibaato ah ayaa soo korodhay

Maya gacaliye anigu sidaan waligay kuu jeclaa ayaan maantana kuu jecalahay kuna jeclaan doona ee caawa soo dhokhso

Wayahay macaan aniga waxaa aan la ladi layahay amaba hurdo ii diiday waa jacaylkaaga marwlbana waxan ka fikiraa sidii aan nolosha kula qaybsan lahaa adiga macaan aad baan kuu jecelahay ee waa inoo caawa

Markii ay intaas is waydarsadeen ayuu Mustafe dib u fikiray waxaanu gar waaqsaday inuu arin cusubi soo kordhay .

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

jacayl dartiis waxa uu ahaa malintaas mid ay ku dheertay wakhtigii balantu oo wakhtiga u arkayay mid aan dhaqaqaynba intay wakhtigii balantu gaadhaysay ayaa kaga badatay buur waxa lagaadhay wakhtigii balantu ahayd Maryana goor horeba waxay sii tagtay gurigii hindiyo Mustafena wakhtigii balanta ayuu ku soo beegay kadib gurigi markii uu garaacay ayay ka furaty Maryan iyagoon wax hadal ah is waydaarsan ayay isku dhageen salaam kal iyo lab ah una badan arami jacayl oo wada jir u haysa waxaanay sidii ahayeen mudo kadib ayay qolkii fadhiga fadhisteen iyagoo wali sidii isku haysta xiiso badanaa kulanka jacaylka ahi marka ay labada qof raalida isku yihiin waxaanay sidi ahadaanba waxay bilabeen sheeko dhadhan jacayl leh layskana waaraysanaayo waxawalba waxaanay aryan mudo ka waraysanaysay reerkii iyo sida lagu ahaa markii uu Mustafe nabad qab badan ku sheegay ayuu ku yidhi

Maryan maxaa cusbaa ee soo kordhay

Inta iyadoo gacmaha gacmihiisa kula jirta ay siyar oo ayar aayar aah ugala baxaday ayay hoos u fooorasatay iyado garan la si ay wax ugu sheegto Mustafe iyo halka ay ka bilaabayso waxana arkay Mustafe oo ku celiyay hadalkii lakiin inta ay wax ay ugu jawaabto garan wayday aayay iyadoo ilamadu indhaheeda qubanayso tidhi;

Macaan Mustafow waligay waan ku jeclaa jacaylkaga dartiis na waxaan u huray nafatayda sidii aan kuu raali galin lahaa marwal iyo daqiiqad walba waxan ku rajo waynaa inan inta noloshayda ka hadhay in aan adiga nolosh kula wadaago lakiin arin waxa uu xumaaday marki ay aabahay iyo hooyaday ay isiyeen nin aanan garaanayn wax aalale wax uu yahay.

Mustafe talo ayaa ku cadaatay hal ilibidhqsina kumuu fikirin arinka ay Maryan u sheegtay ee waxa uu filaayay arimo kale markiiban isagoo aad moodid inuu naxsan yahay ayuu ku yidhi

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

Goorma ayaa lagu bixinayaa

Bari 9subaxnimo

Ma baridan dhow

Haa gacaliye lakiin anigu raali kuma yihi waxan u sheegay xafadayada lakiin cid wax iga dhagaysataba waan wayay waxaanay ii sheegeen in aan kala doorto duco waalid iyo habaar waalid lakiin anigu waxan lajiraa adiga naftaduna adigay raali kaa tahay kumana qasbi karaaayo nin aanay raali ku aahayn inay nolosha la wadaagto markaa anigu adiga madaxagga ayaan ahay ee I meelee runtiina waan ku jecelahay waxa ilmada indhayga ka shubayana maaha wax sahlan ee waa jacaylkaa aad igu beertay

Mustafe waxa uu la yaabay sida adag ee ay ula hadashay Maryan wax uu kumeel gaystona mahayo isago aad uga xun siday wax u dhaceen ayuu yidhi

Maya sidaa ha u hadlin aniguba waan ku jeclaa ee kalidaa imaad jeclayn waxaanaynu ahayn qaar nolosha ku qanacsan inay wadagaan lakin hadii u arin sidaa noqday walal waxaan kaa codsan lahaa inaad habaar waalid waligaa ka dheerato inta karaankaaga ah raacdana siday walidkaa kula jecaladeen inakuna hadii ILLAHAY isku keen qoray is waayi mayno

Maryan way yaabatay sida uu ula hadlay Mustafe lakiin waxayna ogayn in aanu jeebkiisa waxba ku hayn waxayna tidhi

Marna kamaan filayn in aad sidan ila hadli doontid wax walbana anigaa kugu jecel ee adigu igu raac oo kaliya

Mustafe isagoo u caqli celinaya Maryan ayuu ku yidhi

wax wal oo aduunkan ka dhacaa xaga ALLE ayay ka qoran yihiin in sidani dhacdana way qornayd markaa ku samir yeelna siday reerkiinu kuugu taliyeen waayo anigu hadaan maanta ku kaxaysan lahaa meel aan ku geeyo ma haysto lakiin hadaan xataa ku ka xaysto abahaa iyo reerkina kama amaan

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

helayo markaa fadlan hadad maanta in uun I jeceshahay sidaan ku idhi yeel malin manta ka wanaagsan ayaynu is heli hadii ALLE isku keen qoraye

Maryan talaa ku cadaatay ilmada indhaheeda dareeraysaa waxay qoysay wajigeeda waxay sidii u doodaanba waxa uu akhirkii Mustafe ku qanciyay in ay yeesho sida ay walidkeed la jeclaadeen maryan oo oohin darted aan hadal ka so baxayn ayaa iyadoo aad moodid inay naftu ka gurmayso tidhi hadal Mustafe aad u taabtay

ilaa malinkaan ku jeclaaday ilaa manata habeena ma seexan hurdo la'aantaa marwalbana waxaad ahayd mid naftayd ku dheer oo dareenkaygu la jiro hadii aan is idhaa shay qabana adigaan kaa dhex arki jiray iyo wanaagaad ii samayn jirtay daradana waxaan ahaa mid nafateeda u huraty sidii ay jacaylkaeeda u haqab tiri lahayd waxay nafataydu adiga dartaa igu qasbi jirtay in aan sameeyo wax wal oo suuro gal ah maantana adigaa igu qancinaaaya in aan raaco qofkale oo aan oogahay in anan nolosha la wadaagi karayn ogow waxaad naftayda ku qasabtay go'aan aanay waligeed yeeli lahayn adiga dartaana waan u yeelay manta; waxanan ahaan doona mid waralba ku xusta kuna xusuusan doonta waan ku jeclahay ilaa waligayna waan ku jeclaan donaa

Mustafe laftiisu waxa ku soo istaagatay ilmo waxanu marwalba faraha kula jiray indhihiisa wuxuu sidii ahadaba akhirkii waxay ku kala tageen in ay yeesho sidaas madama ay dantu kaliftay waxaanay ku balameen inay soo wada xidhidhaan oo anay sidaa ku kala hadhin.

Markii ay intas is waydarsadeen ayay kala taageeen iyago aad modiid in mid walba Kan kale geeridisiii loo soo sheegay.

Mustafe waxa uu gurigoodi tagay isagoo uu kaga horeeyo Maryan abaheed waxanay ku kulmeen isagoo albaabka ka soo baxaya waxaanay is waydarsadeen weedhaahan

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

Imika ayaad inantaydii ka timid sow mahaa waxan kuu shegayaa hadad guurka caqabad ku noqoto in aad noloshada oo dhan waayi doontid

Mustafe oo habka hadalka u dhashay ixtiraam waalidna ku daraya ayaa yidhi

Adeer inantadiii waan kuu dayay ee ma wax kale ayaad igu haystaa

Isagoon u jawaabin ayaa ay habaryartii soo boday inta ay ka xanaaqady sida adage ee uu mustafe ula hadalay ku tidhi

Hadii inan taadi laguu dayay orod oo Na dhaaf ogowna in aan jacayl laheli Karin lakiin lacag la heli karo

Markii ay intaas tidhi ayuu Maryan abaheed ka tagay

Maryan loo sheeg in abahaeed daydayay oo uu Mustafe gurigoodi tagay markiibana yaabtay iyadoo is garan la waxay samyso iyo dhibka ay u soo jiiday Mustafe ayay qolkeedi hoosta iskaga soo xidhay markiibna waxa yimid abaheed oo aad u cadhaysan wuxuuna ku garaacay albaabkii isagoo u hanjabaya

Iga fur

Inta ay ka furtay ayay iyadoo hoos eegaysa ku fadhiisatay sariirta konahedii markasu ku yidhi isagoo aad u qaylinaaya

Hadii aad diido guurka waxa aad doonayso waanku ogahay labadabana waad seegi oo halkaas aayaad maxbuus igu ahaan markaa anigu bari waan ku sinayaa inankaa iga kaa soo doontay ee dibada ka yimid lacag ku filana haysta ee ma yeeli karo in aad inan yar oo kale ila hoos cararto sidaana ku diyaar garow.

Mustafe waligii marna niyada soo muu gashan in uu Maryan wayayo lakiin wayaha aduun waxwalba way kenan waxanu ku sigtay in ay maskaxdiisu is dhaafto oo uu maryan darted ku sigtay dhimasho waxaana ka war helay abtiyayashii oo isku dayay inay uguriyaan lakiin uuka diiday inan aan Maryan ahayn akhirkina ay kula taliyeen inuu noloshisii cadiga ahayd iskaga

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

soo noqdo oo uu iskulkiisa dhamaysto shaqaystana aanu is raacin aduunyada iyo waxa ka dhaacayaba.

Maryan waxa la siyay nin aanay raali ka ahayn laguna siyay dibada ayuu ka yimid ee aan loo meel dayin hadhow iyo waxa ka iman kara guurkaas Siciid oo ahaa wiilkii la siyay Maryan maarkii u u laaawareegayba waxa u ka dareemay sidaanay raalida uga ahayn iiyo sidaanu raaxada uu guurku lahaa uga helayn waayo naftu waxay ku xasishaa guurka raalida laysku yahay lakiiin guurka labada qof laysugu geeyo dan waalid iyo mid lamida toona ayahiisa ayaa iska yaraada Maryan iyo Siciid waxay sidi u wada jogaan iyagoo dhib mooye aan dheef guur isku qabin ayuu siciid fasaxii ka dhamaaday waxaanu u bohlyoobay carigii England ee uu markii horeba ka yimid markii uu maqnaa mudo sannado ah ee ay wax war ah ka wayday laguna soo sheegay balwado badan oo uu lahaa marki horeba ayaa ay Maryan reerkoodii u tageen reerki inanka waxaana ay ku wargaliyeen in ay inantii so fasaxaan hadii kale ay la wareegan markiba waxa laga war doonay Siciid oo telephone ka lagula xidhidhay isagoon ka warwareeginba waxa uu si toos ah u soo diray warqadii maryan reerkoodiina yaab waxa helay inankiii lakiin waxa la dhadhacay balwadihiisii iyo noloshiii uu ku nolaa oo ka fogayd xaqiiqada kuna salaysnayd khiyaali badan oo ahaa madhalays aan isaga iyo ayihiisa danbeba aan u ficnayn Maryan arinkaa way ku faraxday imikana waxay joogtaa gurigooda waxaany wakhtigeeda ku qadataa inta badan cibadada ALLE iyo guriga oo ay joogto inta badan waayo iskuulkii waa laga saaray wixii looga saaray ee aha guurkana may raali ka ahayn ee waxa uu ahaa guur lagu siyay dibada ayuu ka yimid iyo lacag ayuu leyahay jacaylkeedina way ku wayday nolosha dhamaanteedna wax micno ah ugu ma fadhido waxaanay tahay qof iska nool oo wax walba oo ay noqon lahaydba ay walidiinteed seejiyeen .

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

Mustafe malintuu imitixaankii form four ka baxay waxa uu qabsaday jidka dheer ee loo maro libya ma haysto wax kharash ah oo uu ku tago haduu haystana ma aha mid Ethiopia dhaafina cadhadii uu ka qaaday nolosha uu soo maray iyo gacalisadiisii sida khaldan lagaga qaaday ayaa ku kaliftay inuu u tahriibo qaarada yurub si uu isna u helo darajada dadka xuquudooda lagu luminaayo ee ah dibada ayuu ka yimid.

silic iyo saxariir ayuu ku tagay sudan waxaanu ka noqday kirishbooy mudo markii u ka ahaa waxa uu lacagtii uu ka shaqaystay ugu amababxay saxaraha dheer ee libya loo maro,Mustafe kama maqna dhibta uu leyahay saxarahasi oo warkiisa u hayaa lakiin waxa wata wax ka awood wayn oo aanu iska celin ka rayn oo ah nolosha uu cuqdada ka qaaaday dhamaanteed waxaaanu ku nolaa nolol aanu dhimashadeeda iyo dhayaheeda kala jeclayn waayo waxa uu ka xumaday gabadha uu jeeclaa ee lagaga qaaday walaaga lacag badan yahay iyo dibada ayaa laga yimid oo xataa gabadha labixinayaa aanay raali ka ahayn mustafe waxa uu aaminay weedha ah “jacaylka iyo lacagta lacagta ayaa power wayn” waxaa uu dhib,oon,gaajo,rafaaad iyo dhibaato aduun ku mutay siduu saxaraha aadka udheer uu uga gudbi lahaa aakhirkiina waxaa uu gaadhay libiya waxay ku qaadataba

Mustafe qofka arkaa ee markii hore yaqaanay wuu iska agmarayaa diifta iyo daranyada ka muuqata awgeed iskadaa in lagartee xataa kuma soo suurayn karaysid waayo marwalba waxaa uu ahaa mid ku adag in uu dhib iyo dheefba cagaha soo saaro meesha noloshiisii oo dhan lumisay wuxuu libiya joogoba mudo bilo ah wuxuu bilaabay siduu u baadi goobi lahaa lacag uu doonta kuraaco aakhirkiina waxaa uu shaqo ka helay beeralayda liibiya. Markii uu laba bilood sidaas kushaqaysanayay waxaa u dhamaystirantay lacagtii uu doonta kuraaci lahaa waxaa uuna udhaqaaqay dhinacaa iyo bada isagoo aad uuga warhaya dhibaatada lagala kulmo bada iyo safarka dheer ee

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

ilaa Talyaaniga lagu tago oo aano qof caqli saliima lihi naftiisa uquudheen Laakiin caqliga fayoobi waxa uu kujiraa jidhka fayow meel uu dhul iyo cir maraayo ma oga waxa uu cadna waa inuu nolosha haalkaas taal iyo dibadaa noloshiisii dhantaashay soo arko aakhirkiina waxaa uu doon karaacay xeebaha wadanka liibiya

markay laba maalmood iyo laba habeen bada kujireen ayuu Mustafe xanuunsaday doontiina xumaatay waa badwayn dhexdeed ILLAHAY mooye ee bani aadmi umaqan hadalkiisa daa waxaanu bada kusii dhexjiray afar caano maal oo danbe doontana wuxuu kudul ahaa qof aan nafi kasarayn oo doonta iska dhexyaal aakhirkii waxay badwaynta kudhex silcaanba waxaa badbaadiyey ILAAHAY kasokow markab lagalahaa jasiirada Malta oo Mustafana uqaaday cisbitaal isaga iyo intii ildarnayd dadkii kalena xero qoxoonti.

Markii mudo lagu baxnaninayay cibisbitaalkii ee uu ka soo reeyay kuna soo noqday inuu noloshii caadiga ahayd waxa uu halkiisii ka sii waday socodkisii isagoo gaadhay wadanka ingiriiska oo uu iska dhiibay waxaanu markii uu isdhibayba ku dadaalay sidii uu noloshiisa isbadal ugu samayn lahaa waxaanu ahaa mid qabanayay shaqo wal oo uu ku muytaysan karayay shaqo waaxaanu akhirkii ahaa mid si wanaagsan ula qabasaday noloshii cusbayd lakiin muu ahayn marwalba mid kamadhan jacaylki iyo noloshii u la wadaagi jiray maryan waxanu noqday nin reerkoodi oo dhami ku tirsan yahay isla mudo yar gudaheedan waxa uu reerkoodii u soo raray magalada hargeisa oo uu uga dhisay guri waxaanu ku daadaalay inuu reerkooda u so ka xaysto dalka England markii uu mudo usoo dodayna waa uu kaxaystay abihii oo diday moyee reerkoodii oo dhamina waxay u boholeen cariga UK Mustafe dadaalka adage ee uu noloshiisa u soo galay waxay gayaysisay in

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

dad badan oo aan markii hore u soo jogasan jirin ay imika u soo jogsadaan kana dalbadaan wax wal o ay uga bahdaan Maryan kama war la nolosha cusub ee uu Mustafe ku nool yahay Kaman rajo qabta in noloshii ay waayo wadaagi jireen ay u soo noqoto lakiin Mustafena Maryan xagiisa waxay ka tahay mid wali ah xaas oo saygeeda la joogta waxaanu ahaa mid marwalba niyada ka jecel Maryan markii uu maqnaa muddo sannado ah waxaa uu akhirkii go'aan saday inuu soo xagaa baxo markibana waxa uu dagay gurigii cusbaa ee uu u soo dhisay reerkoda isaga iyo abihii oo hore u sii daganaa .

Markii u yimid ba waxa uu booqday gurigii uu ku soo koray ee habaryartii hadayado badan oo uu u siday ka dib waxa uu si kaftan ah ugu yidhi Maryan iiga waran ileen waxay ahayeen isaga iyoo habaryartii will iyo walidkii oo iska warqaba markiibana garatay ujeedadiisa markasay ku tidhi iyadoo aad modid inay kaftamayso

Orod oo imikaba guurso inan taasi way madax banan tahaye!!

Habo malaha waaad igu ciyarysaa inankii lasiyay ee dibad ka yimid maxa helay

Markuu intaas yidhi ayay habaryartii uga dhacday sheekadu siday u dhacday iyo waxay kal kulantay guurkaas khasabka ahaa waxaanay iyadoo ku dhiri galinaysa ku tidhi

Hooyo wal oo jecel inay inankeda u guuriso waxay la jeceshaahay in ay inankeeda u dhisto maryan wanaageeda awgeed iyo dhagankeeda dinteeda iyo asluub wanaaga ay inaan taasi leedahay habo aniguna waxan ku odhan lahaa kulana jecelahay in aad inantaas guursato

Markii ay intaas tidhi ayuu Mustafe ku yidhi isagoo dhoola cadaynaaya

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

Marki horeba waxan ku jeclaaday wanagaas lagu wada arkay ayuun buu ahaa ilaa malinkaa ilaa mantana malina kamaan saarin maskaxdayda iyo qalbigaygaba toona.

Markii ay intaas is waydarsadeen ayuu u balan qaaday inuu hawsha Maryan gali doono Lana xidhidhi doono iyada

Mustafe habeenkaas oo dhan waxa uu ahaa mid ka fikira maryan iyo sidii uu mar labaad nolol xeel dheer ula wadaagi lahaa habenkiiyo dhana kamuu seexan waxanu ahaa mid la iladaran jacaylkii Maryan ee ku soo laba kacleyay markii uu waagi u baray isagoo sidii ah ayuu goor ay tahay barqo la hadlay Maryan waxaan dhex martay shekadan

Hallo!

Hallo! Maryan miyaa walal

Inta ay yara garatay ayaya hadana shaki ka galay ileen waa jacayl ka baadaye

Waa nigan kula hadlaaya ee waa kuma

Isagoo la kaftaamaya ayuu hadana ku celiyay oo yidhi

Ima garanaysid miyaa

Haa walal ee isku kay sheeg

Inta uu cabaar fikiray ayuu garan wayay wax uu ku yidhaa marka suu soo xasuustay hadal hayskoodii ahaa

Maryan waan ku jecelahay waligayna waan ku jeclaa kuna jeclaan donaa

Markiiba garatay qofka lahadlayaaa cida uu yahay mise waa Mustafe oo aanay meeshaba ka filanayn iyadoo yaaban maskaxdeedana ka dhadhici la ayay ku tidhi

Anaa kaa daran in aan la qiyasi karayn

Markiiba waa lays gartay laysna waraystay mid aad u qoto dheer oo uu jacayl ku dhehan yahay.

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

Kadib waraysigaas iyo wayahii dhacay inta badan wakhtigii ay kala maqnayeen ayay iska xog waraysteen waxanay akhirkii ku balameen guriga Mustafe reerkooda isagoo lahadlaayaana waxa uu yidhi

Gacaliso Bari aynu isku nimaadno adiguna kaalay xafadii saxibadaa hinda aniga ayaa ka soo doonaya ee sidaa haynoo ahaato macaaan

Wayahay gacaliye

Waxaa soo nolaaday jacayl ay wada jilayeen laba isku rali ah oo ay dhan taleen lacag,waalid, dibad iyo wayaha aduunka oo iska badan waxa aanad ka dareemaysay in uu jacaylkii soo laba kacleyay uu maraayo heer uu midho dhalo

Mustafe waaxa uu u diyaariyay gurigoodii isagoo Maryana ugu talo galay soo dhawyn tii ugu wanagsanayd ee intay wadda socdeen kal mutaystaan mustafe waxa uu u soo ababaxay gurii Hindiyo, Maryana gor horeba way soo diyaar garowday iyadoo aad u labisan markii uu soo hor istaagay gurigi ayuu hoonka u garacay Maryan isla markiiba way garatay waxaanay u soo baxaday dagdag iyadoo aad mudid xuural cayn quruuxdeeda ayay soo baxaday markiba Mustafa markuu arkay ayuu gadhigii uga soo dagay isagoo aad modii inuu la indho daradaray quruxda gacalisadiisa iyo sida aanay wayadaa iyo sannado badan isku arag ayuu ku soo orday iyana sidoo kale soo oroday markii ay isa soo hor istageen ayay iyakoon wada hadal isku dhageen ileen waa kalgacyl kala raagaye ay dhunkasho laba is jecel oo kal raagay is dhunkadan isa siyeen markii ay mudo tagnayeen ayay iyakoo gacmaha is haysta fuleen gadhigii markiibana waxay tageen gurigii Mustafiyo, alabaabka markay ka galeen ayay Maryan si wanaagsan u garwaaqsatay sida wanaagsan ee uu gacaliyaheedu u soo tabcaday waxay fadhisteen beer yar oo guriga xagiisa danbe ah oo uu Mustafe u sii diyariyay waxayna ahayeen qaar aad modid inay nolosha wadageen oo ralii isku ah

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

siday isku ag fadhiyeen iskuguna faraxsanayeen waxanay dib u bilabeen jacayl qotodheer oo ay ka soo bilabeen ilaa yarantoodii

Waxaanay wadagayeen sheeko dheer oo is waayo waraysi ah kadib Mustafe waxa uu u soo dadagay arinkii ay habaryartii ku dhiri galinaysay ee ahaa guurka Maryan isagoo usoo bandhigayana waxa uu yidhi

Jacayl mudo dheer aynu soo wadaagaynay ayaa inaga dhexayay dhibaato wal oo uu soo marana manta waynu wada jognaa ILLAHAY mahadii markaa macaan u malayn mayo inaad igu didayso ee waxan jeclaystay in aan kamidha dhalino jacaylkeeni una badalno heer uu lamaanobo oo aynu isku noqono xaaji iyo oridiis

Maryan marna kamay filayn maskaxdeedana may soo galin in uu guur ula iman doono Mustafe waayo waxay ogayd waxay reerkoodu badeen ayay iyadoo dhinacna ka faraxsaan yara xishoonaysana tidhi

Macaan mustafow anigaba waxa ishaa ii yeelay jacaylkaaga ayuu ahaa aniguna waxan raali kugu ahay sidaad raalida iigu tahay arina gacantaada ayuu ku jiraa

Mustafe oo aan sannadaha arag jacaylka Maryan iyo hadalkeedii wanagsanaa dhaqankeedii iyo asluub wanagedii ayuu yidhi

Macaan waxan doonayaa in aan is guursano kuna soo gogol fadhiisto arinkana aan dadajino oo aan walidiinteen u sheegno

Wayahay gacaliye ee anuu caawa ayaan reerka u sheegayaa markaa goorma ayaynu balanta ka dhiganaa

Waxa aan doonayaa in aan malinta isniinta ah ka dhigano doonista isla jimcahana aan aqal galno

Wayahay gacaliye runtiina manta maalin iiga farxad badan isoo marimayso

Maryan habeenkaas oo dhan waxa ay dib u xasuusanaysay hadalkii uu Mustafe ku lahaa markii la sinayay wiilkii dibada ka yimid ee ahaa “fadlan

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

hadaad maanta in uun i jeceshahay sidaan ku idhi yeel malin maanta ka wanaagsan ayaynu is heli hadii ALLE isku keen qoray".

Waxayna aamintay in labadii qof ee ALLE isku qoray oo kaliya ay is calfan nayaan dhibwal oo soo kala dhex gasha.

Maarkiba waxa lagalay hawshii oo Maryan habeenimadiiba markii ay tagtay gurigoodi waxa ay u sheegtay hoyadeed kadibna intuuna abaheed iman ayay iska seexatay markii uu abaheed yimidna waxa u sheegtay hoyadeed oo uga warantay siday wax u jiraan markiiban odaygii u yaabay sida ay wax u dhacayaan iyo inuu inantiisa ka soo doonay wiilku malintii sida arxandarada ula hadlayay markii waagi baryayna waxa uu u yeedhay Maryan oo uu ka waraystay siday wax u jiraan waxanu hadalkeeda ka dhadhansaday sida ay raalida ugu tahay guurkan ,

Tababushihii hawsha ayuu galay Maryan abaheed waxaanu iskugu yeedhay adeeradeed iyo abtiyayasheed una bandhigay siday wax u jireen isagoo hadalkii watana waxaa ka Ag kacay Maryan Adeerkeed Axmed oo aad u kacasan isagoo hadal adag ku hadalaaya si uu hadalkisu u socdo ayuu yidhi

"Walal Maxamuudow gobanimadu sida ku jirtaa dhaqankeenuna dhigayaa waa walal inankaa inanta inaga soo doonay in aynu inantaa siino inakoon ka qaadayn wax allele wixii laga qadi jiray wiil gabadh soo doonay inakoo og sidaynu markii horeba ka yeelanay uguna darno duco badan"

Maryan adeerkeed Axmed marki horeba guurkii Maryan ee hore kamuu raali ahayn waxaanu ahaa mid la dhagaysan wayay gartisii lakiin manta fursad u haysta in tiisa la raaco mudo yar gudaheedna waxa laysku raacay hadalkisii oo aan wax dood ah laga kenin.

Malintii isniintii marki la gadhay ayaa laysugu yimid huteelkii balantu ahayd markiibna layswada salamay laawda fadhiisatay ayuu Maryan adeerkeed ka kacay goobtii bixinta isagoo hadlayana waxa uu yidhi;

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

Marka hore in taan waxba laysa siin aynu is cafino oo aan isa saamaxno madama aynu noqonayno laba reer oo xidid ah

Sidii ayaa layeelay oo waa laysawada gacan qaday Maryan abaheed iyo Mustafena waxay is gacan qadeeen iyakoo ay iskugu danbaysay malintuu gurigooda ugu hanjabay lakiin aad markan modid inay isku yihiin wiil iyo aabo is dhalay

Kadib waxa hadalkii ku noqday Adeero Axmed oo yidhi

“Manta waxaanu idin sinaynaa inantayada Maryan iyadoon inanka Mustafena la waydiinayn wax wal oo inan laga bixin jiray waxananu inanta ugu daraynaa duco badan iyo inay noqdaan labadii gurigoodu jiro ee ubad khayr qaba kala hela”

Markii uu intaas yidhi waxa la soo xidhay xafladii oo aanay dood badan oolin kadibna waxa loo diyaar garoobay arooskii Maryan iyo Mustafe.

Jacaylka runta ahi dhib wal oo uu muto waxa uu ku danbeeya guul marka labada qof raalida isku yihiin maxaa yeelay waxaad ka dhadhan san kartaa sida ay raalida iskugu ahayeen Mustafe iyo Maryan oo mudo badan kala maqnaa hadana jacaylkoodu uu ahaa mid marayay halkii ugu sareyay.

Lacagtuna ay tahay wax laheli karo lana waayi karo lakiin jacayl iyo nolol wanaagsan oo raaxo leh sida lagu helaa ay tahay mid aad u adag maxaa yeelay Mustafe shalay waxa Maryan lagaga qaaday waa lagaa lacag badan yahay maantana waxa lagu siyay iyadoon la waydiin wax allale wixii nin gabadh soo donay laga qaadi jiray nolosha bini aadmiga ayaa ah mid iska daba wareeg ah markii Mustafe uu gurigi tagay waxa niyadiisa ka dhadhici wayday sida wanaagsan ee loola dhaqmay iyo sidii shalay loola dhaqmaayay waxaanu ogaaday in lacagta iyo jacaylku ay yihiin qaar isku cadow ah oo marna kala dila marna isku geeya jacaylka niyada Mustafena waxa ay ahayd mid aad u sareysa waayo waxa uu helay gabadh hablaha wax dheer oo dadka

© 2010: All rights reserved to the Author: www.togdheernews.com

oo dhami ka marag furayeen wanaageda waliba uu ku helay si layaab leh Maryan kamay maqnayn farxda Mustafe oo kale waxanay ahayd mid aad u jecel in ay nolosha la wadaagto Mustafe .

Waxaanay aqal galeen habeen jimce ah waxay wadageen jacayl iyo nolol aan nooceda hore loo arag waaxay ka midho dhaliyeen jacayl ay sannado badan soo jilayeen, noloshu raaxo badanaa, macanaa, wanagsanaa galgacayl badanaa marka raalida laysku yahay qurux iyo wanaag badanaaa marka wax walba la wadagaayo.

Mustafe iyo Maryan manta waxay Dagan yihiin magaalada hargeisa iyago isku leh laba will iyo gabadh.

Wixii talo iyo tusaalayn ah waxaad ku soo hagaajisaa

Email: Mukho4me@hotmail.com **or** mukhinho@gmail.com

Author: **Mukhtaar Abdi Sheikh (Bulshaawi)**

“WAXA REEBAN IN LA DAABACO AMA SIFO KALE LOO ADEEGSADO IYADOON QORAHA LAGA HAYSAN OGALAANISHIYO”

Dhamaad